FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
# لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 16.5-aad. Garowe , 05 January, 2015** **Lam.1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

**Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.**

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**
**Ansxinta Siyaasadda Deegaanka Puntland**

**Qaybta labaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**
**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**
**Waxba ma leh**

***Sharci Lr .8. ee 05/01/2015, kuna saabsan ansixinta Siyaasadda Deegaanka Puntland.***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Sharci Lr. 8. Ee 6. January. 2015, kuna saabsan Ansixinta Siyaasadda Deegaanka Puntland.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/138/2014 ee taar. 31/12/2014

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda siyaaddani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Siyasaadda Deegaanka Puntland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPLS;

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Siyaasaddani waxay noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

Dr. Cabdiweli Maxamad Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland.

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Ref:-*** **XGGW/DPL/138 /2014** **Garoowe, Arbaco** Date:-**31/12/2014**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Siyaasadda Deegaanka Puntland**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobkiisa **64-aad** |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha DPL Ref **MW/DPS/824/2014** ee **8 September 2014** kuna saabsan siyaasadda Deegaanka Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Ansixinta Siyaasadda Deegaanka Puntland |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ku Ansixiyey **09/12/2014** siyaasadda Deegaanka Puntland |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Siyaasadda Deegaanka Puntland.**

***GUUL EEBBE***

***Md. Siciid Xasan Shire***
***Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.***

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

| | | |
|---|---|---|
| **DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMALIYEED**<br><br>**WASARADA DEEGAANKA, DUURJOOGTA & DALXIISKA** | | **PUNTLAND GOVERNMENT OF SOMALIA**<br><br>**MINISTRY OF ENVIRONMENT, WILDLIFE AND TOURISM** |

# SIYAASADDA DEEGAANKA EE PUNTLAND

## NUQULKII UGU DAMEEYAY

**OCTOBER 2014**

## Tusmada Qoraalka

ARAR .......... iv

Eray Bixin .......... vi

I. GOGOLDHIG .......... 2

II. SABABAYNTA SIYAASADDA .......... 4

III. QAYBAHA SIYAASADDA .......... 7

3.1 Mabaadi'ida Siyaasadda .......... 7

3.2 Hiigsiga Siyaasadda .......... 8

3.3 Hawlgalka Siyaasadda .......... 8

3.4 *Yoolka Siyaasadda* .......... 8

**1V. TUBTA IYO ISTIRAATIIJIYADDA SIYAASADDA .......... 9**

4.1 Khayraadka Daaqa iyo Kaymaha .......... 9

4.2 Ilaalinta Ugaarta iyo kala Duwanaanshaha Noolaha .......... 10

4.3 Horumarinta Dalxiiska .......... 11

4.4 Soo saarista iyo Helidda Tamarta .......... 11

4.5 Warshadaha iyo Macdanta .......... 12

4.6 Shidaalka .......... 13

4.7 Isbedelka Cimilada .......... 14

4.8 Abaaraha iyo Xaalaufka Dhirta .......... 15

4.9 Ilaalinta Khayraadka Biyaha .......... 15

4.10 Maareynta Wasakhda iyo Qashinka .......... 16

4.11 Ka qaybgalka Bulshada iyo Deegaanka .......... 17

4.12 Deegaanka Badda iyo Xeebaha .......... 17

4.13 Lahaanshaha Dhulka .......... 18

4.14 Jinsiga iyo Deegaanka .......... 18

4.15 Cilmi Baarista iyo Xogta Deegaanka .......... 19

4.16 Sahminta Saamaynta Deegaanka .......... 19

4.17 Waxbarashada iyo Wacyigelinta Deegaanka ....... 20
**IV. FULINTA SIYAASADDA** ....... 22
5.1 Muddada ....... 22
5.2 Qorshaha Istaraatiijiga ....... 22
5.3 Iskaashiga Heer Gobol iyo Heer Caalami ....... 22
5.4 Diyaarinta Sharciyada ....... 23
5.5 Isku-dubaridka Hay'adaha ....... 24
5.5.1 Kaalinta Maamulka Dhexe ....... 24
5.6 Kaalinta Gobolada iyo Degmooyinka ....... 30
5.7 Kaalinta Ururada Bulshada Rayidka iyo Shirkadaha Ganacsiga gaarka ah ....... 30
5.8 Kaalinta Hay'adaha Horumarinta ....... 31
5.9 Hababka Maalgelinta ....... 32
5.10 Awood Kobcinta ....... 32
5.11 Qiimaynta iyo Dib-u-Eegista Siyaasadda ....... 32

## ARAR

Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska waxa loo igmaday in ay samayso siyaasad ku habboon oo hagta hawsha ilaalinta deegaanka ee ay umadda u hayso. Hase yeeshee, dejinta siyaasadda deegaanka waa in laga qaybgeliyaa dhammaan dhinacyada kale ee daneeya deegaanka si ay si mug leh uga qayb qaataan wax ka qabashada dhibaatooyinka ka jira deegaanka.

Dejinta siyaasaddan guud oo looga golleeyahay in ay hagto arrimaha maaraynta deegaanka waxa ay ku timi hab ku dhisan wadatashi iyo kulamo aqoon iswaydaarsi; kuwaas oo la isugu keenay qaybaha kala duwan ee bulshada si loo xaqiijiyo in dhammaan bahwadaagta arrimaha deegaanku ay fikradooda ku darsadaan siyaasaddan.

Fikirka gundhiga u ah siyaasaddaan ayaa ah in la helo xeerar ku dhisan wadatashi oo suurtageliya maaraynta, dhawrista iyo ilaalinta deegaanka, si ka wanaagsan sidii hore.

Siyaasaddaani waxa ay diiradda saaraysaa arrimaha ay ka midka yihiin; Ilaalinta Tamarta Cusboonaata ee Dabiiciga ah , Daryeelka Duurjoogta iyo Kala Duwanaanshaha Noolaha , Ka Shaqaynta iyo Horumarinta Tamar Beddeli karta tan hadda jirta , Doorsoonka Cimilada , Maaraynta Qashinka iyo Nadaafada Deegaanka , Waxbarashada Deegaanka iyo cilmi-baarista, Dabagalka Saamaynta Deegaanka sida Sahminta Saamaynta Deegaanka , Qodista Macdanta iyo Shidaalka iyo Warshadaha .

Siyaasaddani waxa ay muhiim u tahay Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska iyo dhamaan inta danaysa arrimaha deegaanka ee Puntland. Siyaasaddu waxa ay qeexaysaa yoolka guud ee Wasaaradda 10 ka sano ee soo socda , waxa ay kaloo caddaynaysaa xeerarka iyo tubta loo baahan yahay in la raaco si loo meelmariyoujeedooyinka laga leeyahay siyaasaddan. Waxaa la filayaa in siyaasaddani u noqoto xeer iyo habraac isuduwidda hawlaha wax looga qabanayo deegaanka kuwaas oo ay wadaan bahwadaag kala duwan. Taasna waxaa loo marayaa iyadoo la beegsanayo ujeedooyin isku mid ah, bartilmaameedyo isku mid ah iyo mas'uuliyado qeexan, taas oo danta laga leeyahay tahay sidii kor loogu qaadi lahaa saamaynta iyo waxtarka hawlaha wax looga qabanayo deegaanka.

Habraacyada iyo istiraatiijiyadaha ku xusan siyaasaddaan waxa ay u baahan doonaan in ay noqdaan kuwa la meelmariyo si loo gaaro himilada guud ee la higsanayo 10 ka sano ee foodda nagu soo haysa. Hase ahaatee, fulinta habraacyadan ee u baahan in la qabtaa waxay noqon doonaan kuwa lagu faahfaahiyo qorshaha fulinta kaas oo la samayn doono ka dib marka siyaasaddaan la ansixiyo.Waxaana shaki ku jirin, in meelmarinta siyaasaddani u baahan doonto hanti

iyo kharash taas oo looga fadhiyo dawladda, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo deeq bixiyayaasha.

Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiisku waxa ay u mahadcelinaysaa dhammaan dadkii iyo hay'adihii gacanta ka gaystay samaynta siyaasaddaan. Waxaa mahad gaar ah leh lataliyayaasha farsamo ee wasaaradda oo si hagarla'aan ah gacan uga gaystay dhamaystirka qoraalka siyaasaddaan.

---

**Md.** Guleed Saalax Barre

Wasiirka Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska

**Eray Bixin**

| | |
|---|---|
| CSOs | Ururada Bulshada Rayidka ah |
| EAs | Dabagalka Deegaanka |
| EIA | Sahminta Saamaynta Deegaanka |
| EIS | Warbixinta Saamaynta Deegaanka |
| GDP | Wax soo saarka Guud ee Gudaha |
| GHG | Naqasyada ama qiiqa cagaaran |
| GIS | Habka Maaraynta Xogta |
| GNI | Wadarta Waxsoo saarka Qaran |
| HADMA | Hay'adda Arrimaha Bini-aadnimada iyo Maaraynta Masiibooyinka |
| IAS | Noocayda Noolaha Aan Horay loo Aqoon ee deegaanka Weerarka ku ah (Sida Garan-waaga) |
| LPG | Gaasaska Nadiifka ah ee la shito sida (poorti gaasyada) |
| MDG | Himilooyinka Horumarinta Kun –Xilliyeedka |
| MoEWT | Wasaaradda Deegaanka , duurjoogta iyo Dalxiiska |
| MOPIC | Wasaaradda Qorshaynta iyo Xiriirka Caalamiga |
| NGO | Ururada aan Dawliga Ahayn |
| NRM | Maaraynta Khayraadka Dabiiciga |
| PEP | Siyaasadda Deegaanka Puntland |
| PIP | Qorshaha Fulinta Siyaasadda |
| PPP | Shaqo-wadaagga Dawladda iyo Hay'adaha Gaarka Loo leeyahay |
| PSAWEN | Hay'adda Biyaha , Tamarta, iyo Kahyraadka Dabiiciga |

# I. GOGOLDHIG

Sida la wada ogsoonyahay, Dawladda Puntland waxaa lagu dhisay oo tigimada loogu dhigay geedisocod ku dhisan wadatashi door wayn ay ka ciyaareen madax dhaqameedyada iyo waxgaradka deegaanada ay ka kooban tahay Puntland taariikhdu markii ay ahayd bishii Agoosto ee 1998. Puntland waxaa ku nool dad lagu qiyaaso 3.9 malyan, kuwaas oo 60% ay yihiin reer miyi.

Asaaska dawladda Puntland waxaa looga gollahaa in ay suurtageliso helidda adeegyada asaasiga ah ee bulshada, jawi soo jiita ganacsiga iyo dhismaha bulsho rayid ah oo firfircoon. Maamul ahaan, dawladdu waxa ay ka kooban tahay 9 gobol iyo 39 degmo ay magaalo madax u tahay Garowe.

Waxaa laga wada dheregsanyahay, in u jiro burbur ba'an oo ku habsaday daaqii iyo khayraadkii bad iyo barri, kaas oo ka dhashay gubidda dhirta laga shidayo dhuxusha iyo kalluumaysiga sharci darrada ah ee maraakiibta shisheeye ku hayaan xeebaha Puntland. Hadaba, Dawladda Puntland waxa ay garwaaqsatay muhiimadda ay leedahay dhaqangelinta hab lagu ilaaliyo laguna maareeyo deeganka. Si taas loo hirgeliyo, waxaa la sameeyay Wasaaraddii Xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka ee 1998 si ay u noqoto hay'ad dawladda u qaabilsan maaraynta saddex qaybood oo nolosha iyo dhaqaalaha dadka reer Puntland ku dhisanyahay.

Sababta xoolaha muhiimadda koowaad loo siiyay, loona gadaal mariyay arrimaha deegaanka iyo beeraha, ayaa waxaa ugu wacnaa dhoofinta xooloha oo dalka soo geliya 80% lacagta adag, 40% wax soo saarka guud iyo 60% fursadaha shaqo ee dalka ka jira (Nuqulka Qoryashayaasha Horumarineed ee Puntland 2014-2016) . Sidaa darteed, waxaa la yagleelay Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska Febraayo 2009, si loogu mideeyo hal dallad ah; oo maaraysa arrimaha siyaasadda, istiraatiijiyada iyo mashaariicda loogu talagalay ilaalinta deegaanka.

Arrimaha ugu waawayn ee u baahan in wax laga qabto si loo xaqiijiyo ilaalinta deegaanka Puntland, waxaa ka mid ah: khayraadka biyaha ee sii yaraanaya, daaqa iyo dhirta gabaabsiga ah, isticmaalka xad dhaafka ah ee dhuxusha/xaabada iyo waxsoosaarka badda, noocyada duurjoogta sii dabargo'aysa iyo nadaafad xumada baahsan ee ay weheliso maaraynta qashin ee liidata amaba jirin. Taas waxaa dheer, in Puntland si wayn ugu nugushahay isbedelka cimilada (daadka, duufaanta, abaarta IWM).

Waxaa xil ka saaran yahay Wasaaradda Deegaanka in ay dejiso siyaasad ka tarjunta hiigsiga dastuurka iyo arrimaha kasoo kordha ilaalinta degaanga si loo xaqiijiyo baraare dalku gaaro.

Siyaasaddan ayaa looga golleeyahay in ay noqoto hab guud oo tilmaama ama haga maaraynta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ee deegaanada Puntland. Siyaasaddan ayaa looga fadhiyaa in ay dardargeliso ilaalinta deegaanka iyadoo lagu dhafayo dhammaan siyaasadaha dawladdasi hay'ad waliba isaga xilsaarto ilaalinta deegaanka; looguna miradhaliyo higsiga horumar waara oo Puntland ka gaarto dhinac walba oo nolosha ah.

## II. SABABAYNTA SIYAASADDA

Waxaa lawada ogsoonyahay in burburkii dawladnimo ee 1991 uu meesha ka saaray wixii nidaam ahaa ee lagu ilaalinjiray khayraadka dabiiciga ah taas oo sabab wayn u ah waxyeelada baahsan ee soo gaartay deegaanka. Tani waxa ay na dhaxalsiisay in aanay jirin siyaasad iyo istiraatiijiyad midaysan oo hagta, iskuna dubaridda arrimaha lagula tacaalayo deegaanka.

Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaliya oo ah sharciga ugu sareeya dalka waxa uu amrayaa ilaalinta deegaanka sida ku cad qodobka 25 aad "***Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad-dhaaf ah oo Deegaanka waxyeello u geysan kara.***"

Si taas la mid ah, dastuurka Puntland waxa ku jira qodobo ka hadlaya deegaanka iyo maaraynta khayraadka dabiiciga ah kaas oo asaas u noqonaya wixii siyaasd iyo sharci ah ee lagu hagayo ilaalinta deegaanka .

**Qodobka 54aad ee dastuurka waxa uu qeexayaa in :**

1. *Khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa leh dadka Puntland, waxaana looga faa'iidaysan karaa si waafaqsan sharciga.*
2. *Dawladda Puntland ayaa ka mas'uul ah ilaalinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadkeeda dabiiciga ah.*
3. *Dawladda Puntland waxay heshiis la geli karta shirkado waddani iyo kuwo ajnebi ah, waxayna siin kartaa ruqsadda ka faa'iidaynta khayraadka dabiiciga ah.*
4. *Ruqsad kasta oo la xiriirta ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah waxaa bixinteeda soo habaynaya Golaha Xukuumadda waxaana oggolaanaya Golaha Wakiillada.*
5. *Qaabka saami qaybsiga khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa qeexaya xeer gaar ah oo uu Golaha Xukuumaddu u gudbinaayo Golaha Wakiilada si uu u ansixiyo".*

Sidoo kale **qodobka 55-aad** ee isla dastuurka Puntland waxa uu si cad u amrayaa ilaalinta deegaanka "

1. *Dawladda iyo dadweynaha Puntland waxaa waajib ku ah ilaalinta, dhawrista iyo soo kabashada deegaanka, waana in si cad loogu qeexo heshiis kasta oo la galayo, isla markaana waafaqsan xeerka ilaalinta deegaanka.*

2. *Waxaa reebban baabi'inta kaymaha, laynta duurjoogta, xaalufinta badda, diqaynta dhulka, hawada iyo badda. Cid kasta oo geysata xadgubyada ku xusan faqraddan waxay mutaysanaysaa ciqaab sharciga waafaqsan.*
3. *Waxaa reebban dhoofinta dhuxusha, xoolaha dhaddiga ah duur-joogta iyo wax kasta oo saameyn ku yeelan kara xaalufinta deegaanka.*
4. *Deegaan lagama samayn karo meel aan ku habboonayn, Dawladduna oggolaan.*
5. *Waxaa reebban xirmaynta dhul daaqsimeedka.*
6. *Dawladdu waxay ilaalinaysaa, islamarkaana xilliyeynaysaa ugaarsiga badda.*
7. *Xeer gaar ah ayaa nidaamin doona ilaalinta deegaanka.*

Hadaba, Dawladda Puntland waxaa looga fadhiyaa in ay siiso mudnaan gaar ah ilaalinta iyo badbaadinta deegaanka, maadaama uu lagama maarmaan u yahay badbaadada bulshada, iyo dhawrista khayraadka dabiiciga ah. Sidaas awgeed, daryeelka deegaanku waa in uu noqdo mid sharcigu xeeriyo oo ka arrimiyo.

Siyaasaddani waxa ay aqoonsantahay waxyaalaha dastuurku dalbanayo, waxayna qiraysaa xilka bulshada rayidka ah iyo muwaadin kasta ka saaran ilaalinta iyo dhawrista deegaanka iyo khayraadkiisa iyadoo loo maamulayo hab kasta oo horseedaya kasoo dhalaalidda waajibaadka dastuuriga ah ee ku aadan deegaanka ilaalintiisa.

Siyaasadda deegaanku waxa ay hoosta ka xariiqaysaa sida ay dawladda Puntland uga go'an tahay, iyadoo kaashanaysa dadkeeda, in loo maamulo deeganka si danta jiilka manta iyo kan berriba ku jirto. Ujeedada siyaasaddu waa in la xaqiijiyo maarayn deegaan oo ku dhisan horumar waara oo ka hanaqaada deegaanada Puntland. Siyaasaddu waxa ay ka duulaysaa mudnaanaha horumarineed ee Dawladda Puntland ee 2014-2016, gaar ahaan cinwaanka tiirka dhaqaalaha kaas oo mudnaantiisa 2aad ay dhiiri galinayso **kor uqaadidda ilo tamar ah oo bedel ka noqda isticmaalka (dhuxusha) sida in guryaha lagu isticmaalo Gaaska lashito ama wax lagu karsado "haamaha naqaska loo yaqaan biibi gaaska" ee nadiifka ah iyo kordhinta dhamaan noocyada kale ee tamarta ; sida ka faa'idaysiga tamarta cadceeda, dabaysha iyo biyaha.**

Sidoo kale siyaasaddani waxa ay higsanaysaa gaaridda Yoolalka Horumarinta Kun Xilliyeedka *(Millenium Development Goals)*, gaar ahaan Yoolalkeeda 1aad iyo 7aad , si loo hirgeliyo istiraatiijiyad qaran oo ku dhisan daryeel deegaan oo ay u dhan yihiin qaybaha kala duwan ee dawladdu .

Siyaasadani waa mid u taagan hab ama qaab suurta geliya hagidda dadaalada Dawladda Puntland ugu jirto wax ka qabashada dhibaatooyinka isa soo taraya ee deegaanka sida:

a) ***Maamulka Deegaanka:*** Waxaa jirta baahi loo qabo in la mideeyo siyaasadaha iyo xeerarka u degsan qaybaha kala duwan ee dawladda sida siyaasadaha iyo xeerarka khuseeya tamarta, dhulka, biyaha, kaymaha, xoolaha iyo kalluumaysiga, kuwaas oo saamayn wayn ku leh deegaanka. Waxaa muuqata in siyaadaha saamaynta ku leh ilaalinta deegaanku aanay midaysnayn. Tusaale ahaan; siyaasadaha xeeriya beeraha iyo xooluhu waa kuwo ka baxsan siyaasadda iyo istiraatiijiyadda ilaalinta deegaanka. Sidaas awgeed, waxaa waajib ah in laga jawaabo baahida degdegga ah ee loo qabo siyaasad deegaan oo midaysa siyaasadaha kala duwan, kana dhigta hal mid oo yool qura higsanaysa taas oo ah ilaalinta iyo daryeelka deegaanka.

b) ***Qorshe u Samaynta Deegaanka:*** Waxaa hadda muuqata in qoryayaasha deegaanka wax looga qabanayo ay yihiin kuwo kala yaacsan oo aan si dhammaytiran wax uga qabanayn dhibaatooyinka ka taagan deegaanka. Haddaba, si looga gudbo dhibaatadan, siyaasaddani waxa ay xoogga saaraysaa sidii loo heli lahaa siyaasad midaysan, heer qaran, gobol ilaa degmo si loo horumariyo maaraynta deegaanka loona xaqiijiyo u tooghaynta dhibaatooyinka ka jira heer degmo iyo tuulo.

c) ***Tixgelinta Khayraadka Dabiiciga ah iyo Deegaanka:*** Qiimaha uu ku fadhiyo khayraadka deegaanku waa mid ay adagtahay in la barbar dhigo badeecadaha suuqa yaal.Khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanku waa hanti dadka oo dhan ka dhexeeya. Sidaas awgeed, siyaasaddani waxa ay hoosta ka xariiqaysaa in ilaalinta deegaanku tahay waajib looga fadhiyo hay'ad ka-sta, urur dawli ah iyo mid aan dawli ahaynba, bulsho iyo qof kasta oo ka faaiidaysta ama fuliya hawlo saamayn kara deegaanka. Arrintan ayaa looga golleeyahay sidii loo xaqiijin lahaa kormeer habboon oo lagu xoojiyo wax soo saarka iyo bedqabka deegaanka.

d) ***Dib u soo Noolaynta Dhulka Xaalufay:*** waxaa jirta deegaanno badan oo dhirtii ka nabaad guurtay una baahan dib u soo noolayn. Waxaa ka mid ah arrimaha u baahan wax ka qabashada; joojinta boholaha xaalufka ku haya dhuldaaqsimeedka. Sidaas awgeed, siyaasaddani waxa ay ahmiyad siinaysaa saamaynta iyo fulinta istiraatiijiyad qaran taas oo gacan ka gaysata soo noolaynta dhulka dhirtii iyo kaymihii ka idlaatay iyo dayactirka goobaha biya qabatinka leh xilli roobaadka iyadoo bulshadu ku yeelanayaan gacan iyo talo xoog leh arrintaas.

# III. QAYBAHA SIYAASADDA

## 3.1 Mabaadi'ida Siyaasadda

a) **Shareecada Islaamka:** Waajibadka saaran qof kasta oo Islaam ah waa in uu dhiirigeliyo wixii wanaag ah, reebana wixii xun oo kasta. Haddaba, qofkastaa waa in uu ka ilaashaa dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah wax kasta oo gaboodfal iyo waxyeelo ah oo soo gaari gara.

b) **Sinaanta:** Qof kasta oo Puntland kunool waxa uu xaq u leeyahay in uu ku noolaado deegaan fiyoow, sidoo kale waxaa muwaadin kasta laga doonayaa in uu ilaaliyo isla markaana uu qayb ka ahaado horumarinta deegaanka.

c) **Khayraadka oo Hab Waara loo isticmaalo:** Maareynta deegaanka waa inuu noqdaa mid suurtagelin kara daboolista baahida maanta taagan, iyadoo aan lagu takrifalayn awoodda jiilka danbe in ay daboolaan baahidooda.

d) **Maamul Baahinta:** In lagu dhiiri geliyo dhamaan hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh arrimaha deegaanka, dawladaha hoose iyo qaybaha kala duwan ee bulshada ka qaybgalka hannaanka go'aan gaarista; iyadoo la xaqiijinayo in maamulka maalinlaha ah uu gaaro ilaa heer deegaan hoose.

e) **Mabda'a Feejignaanta:** Meeshii ay ka jirto khatar deegaan, xogyaridu waa inaysan noqon sababo loogu marmarsoodo inaan wax laga qaban ama dib loo dhigo barnaamijyo wax looga qabanaayo guud ahaan deegaanka Puntland.

f) **Mabada'a ah Wasakheeyow Ganaax Bixi *(Poluter Pays Principle)*:** Ciddii ku lug yeelata wasakheeynta, sun ama qashin ku daadinta deegaanka waa in lagu khasbaa in qofkaasi uu bixiyo wasakhda ama dhibaatada uu gaarsiiyey qaybaha baya'adda sida cir, dhul iyo bad intaba.

g) **Mabda'a ah Adeegsadow Bixi *(User Pays Principle)*:** Kharashaadka ka dhalanaya isticmaalka ama kamanaafacaadsiga kheeyraadka waa in lagu daraa magdhawga laga rabo sahmainta, qodista iyo warshadaynta. magdhawgan laga rabo cid kasta oo adeegsanaysa kheeyraadka deegaanka waa in lagu qiimeeyaa xaddiga wax yeelo ee ay u geysanayaan deegaanka isla markaan dakhligaas lagu xalliyaa dhibatada deegaan ee ay geysteen.

h) ***Maamul Wanaagga:*** Maareeynta kheyraadka dabiiciga ah iyo kan deegaankaba waxaa lagu dhafi doonaa: hirgelinta sarreynta sharciga, in laga shaqaysiiyo hay'adaha kala duwan iyo xafiisyada, hufnaanta iyo isla-xisaabtan dhab ah, in la xushmeeyo xuquuqda aadanaha iyo weliba in si macno iyo mugleh muwaadiniintu uga qaybqaataan dhamaanba arimaha khuseeya deeganka.

### 3.2 Hiigsiga Siyaasadda

Deegaan dhawrsoon oo bilaya nolosha iyo dhaqaalaha dhamman dadka reer Puntland, isla markaana joogteynaya isu dheelitirnaanta dabeecadda.

### 3.3 Hawlgalka Siyaasadda

Ilaalinta iyo xannaaneynta deegaanka iyo ka faa'iideysiga kheyraadka dabiicga ah iyo deegaankaba si ay uga wada faa'ideystaan dadka iyo dalka Puntland.

### 3.4 *Yoolka Siyaasadda*

Yoolka guud ee laga leeyahay siyaasaddan ayaa ah in ay noqoto mid horseedda horumar bulsho iyo mid dhaqaale kaas oo are u qaadaya tayada deegan iyo waxsoosaar ee dalka waqtiga fog si loo daboolo baahiyaha jiilka maanta iyadoon tanaasul (gorgortan) laga samaynayn awoodda jiilka soo socdaa u yeelan karo daboolidda baahidooda.

### 3.5 Ujeedooyinka Siyaasadda

**a)** In si dhamaystiran looga ilaaliyo dadka, dhirta, ugaarta, meelaha ay ku dhaqanto ugaartu iyo goobaha taariikhiga ah falalka waxyeelada u gaysan kara haddii ay ahaan lahaayeen kuwa rabbaani ah ama bini-aadmigu sababo;

**b)** In lagu dhafo faa'iidada iyo khasaarada dhaqaale , bulsho iyo deegaan ee kahyraadka dabiiciga ah dhammaan qoryashayaasha horumumarinta deegaanka;
**c)** In la horumariyo nadaafadda goobaha dadku degaan iyo daboolidda baahiyaha nadaafadeed iyo caafimaad ee bulshadu qabto ;
**d)** In la yareeyo wasakhaynta dhulka, hawada iyo biyaha sida uga habboon uguna kharash yar taas oo aan ka hor imaanayn horumarka dhaqaale;

e) Kor u qaadista wacyigelinta bulshada iyo fahanka xiriirka ka dhexeeya deegaanka, caafimaadka iyo horumarka.

# 1V. TUBTA IYO ISTIRAATIIJIYADDA SIYAASADDA

## 4.1 Khayraadka Daaqa iyo Kaymaha

Waxyeelada baahsan ee la soo daristay dhul daaqsimeedka Puntland iyo weliba in si xad dhaaf ah loo jarayo dhirta iyo keymaha, taasoo ay sii raacdey dhibaatooyinka ay keentay isbedelka cimilada (sida: abaaro daba dheeraaday, heer kulka oo sii siyaadaya & duufaano), daajinta xoolaha xad-dhaafka ah, jarista iyo gubista dhuxusha iyo sidoo kale dhir aan hore uga bixi jirin dhulkeena oo hada fara kulul ku haya dooxoyinkii daaqa (Kaligii noolaadaha); dhammaan dhibaatoyinkaasi waxa ay saamayn ba'an ku hayaan wax soo saarkii kheyraadka dabiiciga ah ee dhulweynaha Puntland. Sidaa si lamid ah, magaalaynta aan la qorsheyn, iyo xad gudubka beerafalashada kusii fidiya dhul daaqsimeedkii iyo kaymihii waxa ay abuurtay khilaafyo deegaaan oo dhulka salka ku haya.

**Talloobooyinka Istiraatiiji**

Si loo hurumariyo ilaalinta iyo maaraynta kaymaha iyo dhul-daaqsimeedka xoolaha , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa:

a) In la Diyaariyo lana fuliyo mabaadi' qaran iyo habab majaraha u qabta in si miisaaman looga faa'idysto loona maareeyo kheyraadka dabiicga ah ee Puntland;

b) In la yareeyo gubista dhuxusha gudaha wadanka laga isticmaalo iyadoo la dhiiri gelinayo isticmaalka ila-tamareedyo kale oo aan dhibaato u keeni Karin deegaanka oo wax lagu karsado.

c) In laxakameeyo magaaleynta xad-dhaafka ah, dhismaha barkadaha iyo dhammaan hababka biyaha dhulka guntiisa ku kaydsan looga soo saaro kuwaas oo laga samaynayo dhulka asal ahaan daaqa xoolaha ku can ka ahaa;

d) In lasoo nooleeyo keymaha iyo duldaaqsimeedka waxyeelloobay iyadoo la hirgelinayo habka daaq xilliyeedka iyo seeraynta dhulka ;

e) In la Xakameeyo faafida dhirta waxyeelada ku haya wax soosaarka dhul daaqsimeedka, iyo baya'ada dabiiciga ah ee wadanka sida geedka loo yaqaan "Garanwaa" (*Prosopis Juliflora*).

f) In la siiyo mudnaanta ugu wayn sidii loo maareyn lahaa goobaha biya qabatinka ah, iyo in laga hortago carra-guurka lana horumariyo wax soo saarka ciidda.

g) In la mariyo mashaariicda muhiim ka ah ee maaraynta iyo ilaalinta carrada iyo biyaha daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyadoo la ogaanayo

faaiidada deegaan iyo dhaqaale ama mid khasaaro ee ka imaan kara mashaariicda lagu ilaalinayo goobaha biyo-dagga leh.

h) In la dar- dargeliyo hab isku dhaf ah oo ay kawada qaybgalaan dhammaan hay'adaha ay khusayso ee dawladda iyo ururada aan dawliga ahayn iyagoo qaadaya tallaabooyin lagu ilaalinayo carrada iyo biyaha.

i) In daraasad lagu sameeyo noocyada duurjoogta iyo dhirta ee dabar go'a khatarta ugu jirta .

## 4.2 Ilaalinta Ugaarta iyo kala Duwanaanshaha Noolaha

Tobanaankiii sano ee ugu dameeyay, ugaarta ku dhaqan gobollada Puntland ayaa waxa soo food saaray bur bur dhinac walba leh kaas oo ragaadiyey bilicdii deegaanka. Waxaana jirta fursad ama rajo yar oo laga qabi karo in ugaarta dalku noqoto mid looga faaiidaysto dalxiiska maadaama deegaankeedii la baabi'iyay, ugaarsi sharci darro ahna ku socdo. Sidoo kale, waxaa jira in kala duwaanshaha noolaha ee dalku khatar ku jiro sida dabar go'a qayba ka mid ah xayawaanadii dhulka ku noolaan jiray, waxyeellaynta goobihii ugaartu ku dhaqmi jirtay, xaalufka kaymihii dabiiciga ahaa iyo seerayaashii daaqa sababo kala duwan awgood oo ay ka mid yihiin dhuxusha dhirta laga shidayo, beera qodasho deegaanka lid ku ah , habab xoolo-daaqsi oo gurracan iyo deegaamayn aan loo meel dayin .

**Tallaabooyinka Istraatiiji**

Si loo dhawro, loogana faaiidaysto kala duwanaanta noolaha iyo ugaarta dalkeena hab waara , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In la soo saaro oo la faafiyo sharci gaar u ah ilaalinta iyo maaraynta duurjoogta si loo xaqiijiyo ilaalinta , dhawrista iyo horumarnta meelaha ay ku dhaqanto ama ku firiqsantahay ugaartu ;

b) In kor looqaado hababka ilaalinta dhirta iyo ugaadha kuwaas oo lagu xannaaneynaayo ayaga oo jooga meeshii ay asal ahaan ku noolaayeen (*in situ* systems). Sidoo kale qaybo kalena lagu xanaaneeyo meelo kabaxsan meshii ay asal ahaan ku noolaayeen (*ex situ* systems);

c) In la mamnuuco ugaarsiga iyo ka ganacsiga duurjoogta iyo waxyaabaha laga soosaaro;

d) In la sameeyo qorshe hawleed heer Dawladda Puntland ah oo lagu ilaalinayo kala duwaanshaha noolaha.

## 4.3 Horumarinta Dalxiiska

Maadaama Puntland ay leedahay taariikh soo jireen oo ku siman ilaa xilligii Faraaciinta, magaalooyinka taariikhiga ah, buuraha, qalcadaha sayid Muxammed Cabdulle Xassan iyo dhismayaashii boqoradii iyo suldaamadii ka talin jiray dhulka Puntland, waxaa jira fursad ay Puntland u leedahay sabo-deegaaneed dalxiis, haddii si wanaagsan loo xafido. Hase yeeshee, in aanay jirin siyaasad qeexan iyo aqoon-khibradeed waa midda ragaadisay dalxiiska in uu noqdo il-dhaqaale laga dhalin karo Puntland gudaheeda.

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo soo saaro istiraatijayad qaran oo looga golleeyahay kor uqaadidda sabo-deegaaneed dalxiis oo jaal (saaxiib) la ah deegaanka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In la dejiyo siyaasad qaran oo hagta dalxiiska;

b) In la qoondeeyo qarashaad lagu dhiiri gelinayo hirgelinta sabo-deegaaneed dalxiiska ku habboon oo ka qayb qaata ilaalintisa ;

c) In loo weeciyo qayb kamid ah dakhliga dhaqaale ee kasoo xerooda dalxiiska bulshada maxalliga si loogu dhiirigeliyo ka qayb qaadashada iyo dhowrista kheeyraadka uu ku tiirsan yahay dalxiisku;

d) In sara loo qaado fikradda abuurista sabo-deegaaneed dalxiis kaas oo noqon kara il-dhaqaale oo dakhli kasoo xeroodo.

## 4.4 Soo saarista iyo Helidda Tamarta

Iyada oo isticmaalka tamartu la kordhayso kororka tirada dadka, horumarka dhaqaale, iyo warshadeed, waxaa lama huraan ah in la xaqiijiyo helidda ila tamareedyo kala duwan oo isu dheelitiran. Haddaba, soo iibsiga iyo isticmaalka tamarta waa in uu noqdaaa mid la jaan qaadaya hababka ilaalinta deegaanka iyo ku tallaabsiga mabaadi'da horumarka waara iyada oo loo marayo arrintaan in la yareeyo raadka xun ee deegaanka ku imaan kara.

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo kordhiyo helitaanka tamarta iyadoo la yareeyo yaraynayo raadka xun ee ay ku yeelan karto deegaanka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In kor loo qaado ilaha tamarta ee bedelka u noqon kara dhuxusha iyadoo la hirgelinayo hab tamareed la cusbooneysiinkaro sida tamarta cadceeda, dabaysha iyo korontada laga dhaliyo mawjadaha badda, iyo ilo tamareedyo kale sida haamaha naqaska wax lagu karsado (biibi-gaas);

b) In la horumariyo dhiraynta dhulbeereedyada, xaafadaha iyo kobaha ku yaala dhul daaqsimeedyada nabaadguurku khatarta ku hayo si markaa loo kordhiyo dhirta loogu baahanyahay xaabada, falagta, agabka dhismaha, farsamada, miraha la cuno iyo waxyaabaha kale oo geedaha laga helo;

c) In la xoojiyo hirgelinta aragti ku dhisan wax soosaar tamareed nadiif ah iyo isticmaalka tamar tashiilan oo aan takrifal ku jirin;

d) In la hirgeliyo helitaanka iyo isticmaalka tamar qiima jaban iyadoo loo marayo habka samaynta shirkado ay ku bohoobayaan dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo iyada oo dawladdu kabid kharash u samaynayso shirkadaha soo dejiya tamarta si loo dhimo qiimaha qaaliga ah ee tamartu ugu kacayso dadka dakhligoodu hooseeyo.

## 4.5 Warshadaha iyo Macdanta

Wax soo saarka warshadaha ee Puntland ayaa ah mid soo koraya oo wata astaamo wasakhayn iyo khatar u gaysan kara deegaanka. Dhibaatada ugu weyn oo Puntland soo wajahday ayaa waxay tahay in aysan jirin hagayaashii iyo hal beegyadii lagu maarayn lahaa; wax soo saarka, qaadista, isticmaalka, kaydinta iyo aasidda kiimikada sunta ah iyo waxyaabaha dhibaatada leh.

Sidoo kale, kororka rabitaanka loo qabo qodista macdanta ay u leedahay dhaqaalaha waxa ay istaahishaa fiiro gaara iyadoo diiradda la saarayo burburka deegaan ee ka dhalan kara.

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo xaqiijiyo in ogolaanshaha iyo fulinta hawlaha horumarinta warshadaha macdan qodista iyo warshaduhu u noqdaan mid aan deegaanka wax udhimayn, Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) Ogolaanshaha warshadaha iyo macdan qodista waxaa khasab ah in laga hormariyo daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka, iyadoo ay fulinayso wasaaradda ku shaqada leh;

b) Kahortagga qodaalka godadka macdanta aan loo meeldayin si loo yareeyo nabaad guurka ciidda, burburka dhulka iyo waxyeelada geedaha, duurjoogta iyo kheyraadka biyaha;

c) Dejinta iyo Meelmarinta hal beegyo qeexan oo haga xabaalidda iyo rasaynta qashinka warshadaha iyo macdanta kasoo hara si loo hubiyo in qashinkaasi (haraaga) aanu faafin waligiis.

d) In la caddeeyo, lana dabagalo u hoggaansanka iyo ku dhaqanka xeerarka loo dajiyay soo noolaynta ciidda iyo dhirta ku taalla dhulka macdanta laga qoday.

e) In la sameeyo dabagal joogto ah oo lagu hubiyo dhaqangelinta habab iyo farsamooyin casri ah oo loo adeegsado dhamaan hawlaha warshadaynta iyo macdan qodista;

f) In la hergeliyo mabda'a ah "Wasakheeyaha deegaanku in uu isagu dhusha u rito wixii dhib ah oo deegaanka falkiisa ka soo gaara" si la mid ahna loo fuliyo mabda'a feejignaanta wasakhaynta Degaanka, iyadoo la hubinayo in dawladaha hoose iyo shirkadaha la yimaadaan qorshayaal ugaar ah oo wax ka taraya xakameynta dikhowga iyo qashinka;

g) In la jaangooyo heerka jabaq ama sawaxan ee la ogolaan karo kaas oo kasoo baxaya meelaha dhismaha iyo wershadaha laga wado ;

h) Meelmarinta Hindisaha Daahfurnaanta Hawlaha Qodaalka Macdanta (EITI) si loo fududeeyo daahfurnaan iyo la xisaabtan dhaba oo ku aadan ka faaiidaysiga khayraadka macdanta.

## 4.6 Shidaalka

Hanka mustaqbal ee soo saarka saliida iyo Gaaska Puntland waa mid aad u sareeya. Niyad wanaagaas ayaa dhiiri gelinaaya in si xoog leh loo qado loona soo saaro saliida iyo shidaalka. Horumarka waara ee gaaska iyo saliida ayaa waxa uu leeyahay muhiimad dhaqaale oo sare; balse waxaa ka dhalan kara dikhow deegaan iyo khilaaf bulsho .

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo dhiirigeliyo habab sahamin iyo soo saaris shidaal oo aan wax u dhimin deegaanka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) Hirgelinta siyaasad qaran oo ilaalisa deegaanka; hubisana sida ugu habboon oo dhaqaale looga samayn karo qodista iyo soo saarka saliidda, iyadoo wax ku filan loo kaydinaayo qorshayaasha mustaqbalka, sidoo kalena tixgelin la siinaayo deegaamada laga soo saaraayo shidaalka iyo gaaska;

b) In la xaqiijiyo yareynta waxyeelada soo gaareysa goobaha laga soo saarayo saliida, haddii ay ahaan lahayd , carrada, dhirta, duur joogta, xoolaha, biyaha iyo weliba meelaha ay xooluhu daaqaan waqtiga lagu guda jiro sahminta , soo saarka, kala sifaynta, rarida iyo suuq gaynta shidaalka ;

c) In la yareeyo bara-bixinta ama waxyeelada dadka deggan goobaha shidaalka laga qodayo , sida in waxyeela soo gaarto wadooyinka ay adeegsadaan , goobaha taariikhiga u ah, goobaha ay ku cibaadaystaan iyo hababa nololeedka ay ku tiirsanyihiin , hadiibase laga fursanwaayo waxyeellayntaa, waa in dadkaas la siiyaa magdhaw ay ku qancaan ;

d) In laga soo saaro shuruuc adag arimaha la xiriira qaababka ugu habboon ee ururinta, la tacaalida iyo aasidda qashinka ka soo hara qodista shidaalka;

e) In la baaro tayada biyaha ku jira goobaha furan (dur-durada iyo balliyada oo kale), ilaha biyaha, ceelasha gacan qoddi ga ah, iyo ceelasha riigga ee ka dhow

meelaha shidaalka laga soo saarayo si looga hortago wasakh ama sun u dusi karta ilo-biyoodyadaas;

f) In lagu dhiirigeliyo dadka ka shaqaynaya soo saarka shidaalka in ay sameeyaan diiwaan gelinta wixii saliid qubata ah iyo shil kasta oo kale oo waxyeelo u gaysan kara tayada deegaanka iyaga oo markaba u gudbinaya warbixinta arrimahaas hay'adaha ay kusayso ;

g) In la soo saaro hal beegyada ugu hooseeya ee lagu cabiri karo bad-baadada deegaanka shidaalka laga qodayo iyadoo la adeegsanayo habka dabagalka iyo kormeerka qalabka iyo warshadaha shidaalka lagu soo saaro si loo xaqiijiyo in ay raaceen hal beegyadii loo dajiyay ilaalinta deegaanka.

## 4.7 Isbedelka Cimilada

Waxa ay isku raacsanyahay Ururka Dawliga ah ee Qaabilsan Doorsoonka Cimilada (IPCC) in uu yahay yahay wax dhab ah oo bini-aadmigu intiisa badan masuul ka yahay, maadaama uu qiiq ama naqas sun ah ku siidaayo hawada arlada ku shaqlan. Somaliya /Puntland sida waddamo badan oo kale, waxaa xil kasaaranyahay in ay u tooghayso isbedelka cimilada iyo saamaynta uu wato sida abaaraha soo noqnoqda, dufaanada, dabaylaha xooga badan iyo daadka soo rogmada xilli roobaadka kuwaas oo ku reebaya saamayn gurracan hab nololeedka iyo caafimaadka dadka.
Si haddaba wax looga qabto doorsoonka cimilada, labo hab ayaa Wasaaradda Deegaanku adeegsan doontaa , kaas oo looga golleeyahay in la gula tacaalo sababaha keena isbedelka cimilada (qiiqa hawada wasakheeya ) iyo qaadidda tallaabooyin la jaan qaadaya raadka xun ee ka dhalan kara doorsoonka cimilada .

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si gacan looga gaysto dejinta siyaasad iyo sharci haga kormeer joogto ah oo la gu sameeyo doorsoonka cimilada taas oo dikhaw u gaysanaysa hawada arlada ku shaqlan (ku xeeran) , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In la sameeyo lana fuliyo siyaasad guud oo ku aadan doorsoonka cimilada iyo soo saarista qorshayaal laqabsi (la jaan-qaadaya xaaladda jirta);

b) Iyada oo la kaashanaysa hay'adaha ay kusayso, in ay gacan ka gaysato rakibidda ama samaynta hab casriyeysan oo awood u leh in uu waqti ku habboon ka sii digo masiibooyinka si waqtiga ku haboon looga hortago loona maradhaamiyo maasiibooyinka dabiiciga ;

c) In la dhiso lana xoojiyo awoodda Wasaaradda Deegaanku u leedahay samaynta cilmi baaris ku aadan doorsoonka cimilada iyo waxyaabaha kale ee deegaanka khuseeya;

d) In la sameeyo wacyigelin iyo waxbarasho deegaan oo looga golleeyahay in lagu horumariyo baaxadda waxqabad ee bulshooyinka iyo bud-dhigayaasha kale;

e) In la la yeesho xiriiro iyo wax wada qabsi xaruumaha kor-joogteeya ama la socda doorsoonka cimilada ee ku yaalla gobolks (sida kuwa ku yaal IGAD, Bariga Africa ama Africa ba ).

### 4.8 Abaaraha iyo Xaalaufka Dhirta

Abaaraha iyo xaalufka waa dhibaatooyin deegaan oo waaweyn oo farakului ku haya degaanada Puntland. Xaalufka baahsan ee ay weheliyaan abaaruhu waxa ay horseed u tahay cirib xumo deegaan sida daaqa xoolaha oo yaraada , dhulka oo biyaha qabsan waaya, kala duwanaashaha noole oo hoos u dhac ku yimaado , cimilo goobeed aan la mahadin oo is bed-bedel badan sida kuleylka, roobka iyo dabaylaha, doorka nuugitaanka dhirta ee kaarboon 2-ogsaydh oo yaraada, qiiqa hawada wasakheeya oo hawadu nuugtu taas oo keenta arlada oo sii kululaata , ciid guurka , samaysanka boholaha oo kordha iyo kobihii dhirta iyo wax soo saarka kaymaha oo luma.

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo sameeyo istraatiijiyad heer qaran ah oo lagu xakamaynaayo xaalufka dhirta , loona yareeyo raadadka ka dhasha abaaraha , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In la dhiirigeliyo fulinta barnaamijyo camali ah oo dib dhirta loogu beerayo iyadoo la isticmaalaayo habab horay loo tijaabyey oo lagu beerayo dhirta abaaraha u adgaysta iyo kuwa dhaqaale ahaan manaafacaadka inoo leh ;
b) In la hirgeliyo hab casri ah oo ka sii diga abaaraha intaysan dhicin;
c) In la kordhiyo iskaashiga caalamiga ah ee dhinacyada, tababarada, cilmi baarista iyo helitaanka farsamo casri ah oo jaal la ah deegaanka iyo weliba kaalmo dhaqaale oo wax ku ool ah;
d) In la yareeyo adeegsiga dhuxusha dhirta laga shido iyadoo laga faaiidaysanayo tamaraha kale sida gaaska naqaska iyo tamarta cadceeda IWM;
e) Sare uqaadidda soo noolaynta dhul daaqsimeedyada waxyeelloobay iyo dib usoo celinta noocyada dhirta khatarta ugu jirta in ay dabar go'do.

### 4.9 Ilaalinta Khayraadka Biyaha

Biyo tiro iyo tayo leh oo haqabtira baahida dadka iyo xoolaha iyo weliba beeraha waa kuwa gabaabsi ah amaba la la' yahay. Biyo yaraantaasi gobolada qaar waxa ay sabab u noqotay isku dhacyo dhex mara qabaailka iyo in ay uga sii darto waxyeeladii deegaanka lagu hayay. Horumarinta biyo haqabtira baahida miyi iyo magaalo waxaa caqabad ku ah dhaqaale yaraan, goobaha biyaha nadiifka ah laga helo oo aan dadka iyo duunyada deeqin, deegaamo firiqsan iyo wacyigelinta iyo aqoonta dadku u leeyihiin faya dhawrka oo hoosaysa.

**Tallaabooyinka Istraatiijiga**

Si loo xaqiijiyo in biyaha noqdaan kuwa loo isticmaalo dhinacyada dhaqaale iyo bulsho iyadoo khatar la galinayn deegaanka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In la qaado tallaabooyin looga golleeyahay in lagu xoojiyo isu dheelitirnaanta biyaha iyo deegaanka ;

b) In la qaado tallaabooyin lagaga hortagayo wax yeelada soo gaarta deegaanka ku xeeran goobaha biyaha ;

c) In laga hortago qashinka iyo wasakhda lagu daadiyo waadiyada/Togagga, moosaska (kannaalada) iyo goobaha biyo rogga ah, iyadoo la mamnuucayo nooc kasta oo qashin ah oo lagu shubo agagaarka baraha biyaha iyo in laga taxadaro qashin u gudba biyaha ku keydsan gunta hoose ee dhulka;

d) In la xaqiijiyo u hoggaansanka xeerarka lagu ilaalinayo tayada biyaha iyo maaraynta wasakhda.

## 4.10 Maareynta Wasakhda iyo Qashinka

Caqabadaha ugu waaweyn ee haysta maareynta qashinka waxaa ka mid ah: iyada oo si aan loo meel-dayin loogu daadiyo qashinka goobaha qashin-qubka ah, wasakhda oo daadata marka la rarayo, iyada oo goobaha qashin qubka ahi aysan lahayn xayn-daab muuqda kaas oo xakameeya qashinka iyo khatar ka jirta in walxaha sunta ahi ay usoo gudbaan goobaha biyaha iyo hawada oo sidaas ku wasakheeyaan. Sidoo kale waxaa jira qashinka oo lagu daadiyo togagga iyo meelaha biyo rogga ah kaas oo markii biyuhu soo maraan ay dadka isticmaala ku xanuusadaan.

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo soo saaro qorshe qaran oo ku aaddan maaraynta qashinka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) soo saarista iyo fulinta siyaasadda maaraynta qashinka deegaanka taas oo leh tub iyo hagayaal qeexan;

b) In la xaqiijiyo hirgelinta hab ku haboon oo lagu aruuriyo, qaado laguna xabaalo/maareeyo qashinka magaalooyinka iyo goobaha caafimaadka , kaasoo oo laga hirgalinayo dhamaan degmooyinka Puntland;

c) In la diyaariyo lana fuliyo habab wax looga qabto ama lagu xalliyo daadashada walxaha kiimikada ah, shidaalka IWM;

d) In la dardargeliyo hirgelinta Xeerka Lr 2 ee 09/01/2013 kuna saabsanaa Mamnuucidda adeegsiga bacaha balaastiga ah ee aan deegaanka ku baabi'i karin, (non-degradable) , sidoo kale na la dhiirigeliyo in dukaamaysiga loo adeegsado danbiilo aan wax yeelayn deegaanka;

e) In la soo saaro xeerar lagu xakamaynayo dhaqdhaqaaqa iyo qubidda sumaha khatarta ah ee isaga gooshta xuduudaha Puntland la leedahay wadamada kale.

### 4.11 Ka qaybgalka Bulshada iyo Deegaanka

Bulshada oo ka qaybqaadata maaraynta khaayraadka iyo ilaalinta deegaanka waa mid aan looga gollahayn oo kaliya in lagu taxo (liis gareeyo) baahiyaha ay qabaan , laakiin ay tahay in lagu qalqaaliyo isbedel ku yimaada hab dhaqankooda iyo fikirkooda si ay ugu adeegsadaan khayraadkooda hab waara .

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo ga qaybgeliyo arrimaha qorshaynta , fulinta, kormeerka iyo qiimaynta hawlaha deegaanka dadwaynaha iyagu ka faaiidaysta khayraadka dabiiciga ah , looguna caawiyo sidii ay ku maarayn lahaayeen khayraadka ilaah ku manaystay, Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In la xaqiijiyo in dhamaan ururinta, lafa-guridda iyo baahinta xogta deegaanku ay noqoto mid dhammaan bud-dhigaasha deegaanku isla wada wadaan oo leh halbeegyo lagu hubiyo, laakiin marnaba aanay xogta deegaanku noqon mid heerka dawladda dhexe ku kooban.

b) In la Dejiyo shuruucda muhiimka ah iyo bixinta taba-barrada iyo taageerada dhaqaale taas oo suurtagelinaysa in bulashada maxalliga ahi si firfircoon uga qayb qaadato maareynta kheeyradka dabiiciga iyo deegaanka ba;

c) In la Xoojiyo awoodda aqooneed iyo farsamo ee bulshooyinka si ay u noqdaan kuwa ku xalliya khilaafaadka dhexdooda ah hab nabdoon, gaar ahaan khilaafaatka ka dhasha u baratanka loogu jiro ka faaiidaysiga khayraadka dabiiciga.

### 4.12 Deegaanka Badda iyo Xeebaha

Kalluumaysiga Puntland ayaa ah tiir kamid ah tiirarka dhaqaalaha Puntland, gaar ahaan bulshada ku nool xeebaha, taas oo lacag adag ku kabta dhaqalaha wadanka. Haddaba dhibaatoyinka ragaadiyay (la haray) kheyraadka badaha iyo xeebaha Puntland waxaa ka mid ah: jiriifka axmaqnimada ah ee uu gaysto kalluumeysiga sharci darrada ah, nabaad guurka xeebaha iyo ku shubidda qashinka sunta ah. Arrintan boobka iyo bililiqada isugu jirtaa, waxa ay horseedi kartaa in uu badda ku yaraado noocyadii kalluunka iyo noolaha kale ba, taasoo dhaawac halis ah ku ah kalluumaystada yar yar iyo guud ahaan tayada nololeed ee dadka Puntland.

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si sare loogu qaado in aan u adeegsano khayraadka badda hab waara , una dhawrno sabo-deegaaneedka xeebaha ee nugul, Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) Soo saarist shuruuc waafaqsan axdiga caalamiga ah ee xakamaynta Dikhawga Badaha ee ka dhasha ku aasidda wasakhda sunta ah .

b) Kahortagidda waxyeelaynta lagu hayo tayada biyaha badaha Puntland taasoo ka dhalatay dikhowga ama qashinka lagu shubayo.

c) Dib usoo nooleynta iyo ilaalinta kheyraadka dhirta ee kabaxda xeebaha sida sabo-deegaaneedka kaymaha Shawriga"mangrove ecosystems" iyo ilaalinta shacabyada ama jabalada/godadka kalluunku ku dhalo (coral reefs);
d) Kobcinta iskaashi wada-shaqayneed oo lala yeesho wadamada deriska iyo maamulada ka jira gudaha Soomaaliya, si markaasi la isaga kaashado barnaamijyada horumarineed ee ilaalinta khayraadka badda, la isna waydaarsado aqoonta iyo macluumaadka la xiriira badaha iyo xeebaha.

### 4.13 Lahaanshaha Dhulka

Waxaa jira xiriir toos ah oo ka dhexeeya lahaanshaha dhulka iyo waxyeelada deegnka Puntland maadaama cidii doontaa ay dhulka say doonto ugu habsatay taas oo sababtay dhulkii oo waxyeelo kasoo gaarto daaqsinka xad dhaafka ah, baratanka xirmaysiga dhulka, deegaamaysiga aan sharciyaysnayn, berkado meeshii doona laga qodo iyo beer falasho khatar ku ah degaanka. Taas waxaa sii dheer, iyadoo ay jirto isqabqabsi meel xun maraya oo qabaailku ay isku haystaan lahaanshaha dhulka iyo wadaagga khayraadka meelo badan oo Puntland ka mid ah.

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo xaqiijiyo in dhulka , kaas oo khayraad muhiim ah ka ah Puntland, aanu waxyeelloobin ,.loona isticmaalin qaab aan qorshaysnayn oo fawdo ah , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinkasoo socda :

a) In la dar-dargeliyo soo saarista siyaasad iyo xeer haga dhulka, lana diyaariyo qorshihii lagu fulin lahaa.
b) In dawladdu gacan ka gaysato in si ku habboon oo waara loo maareeyo wadaagsinkii soo jireen ka ahaa ee dhulka iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah ; kaas oo hidde iyo dhaqan ay u lahaayeen bulshaweynta reer Puntland;
c) In la aqoonsado, lana ilaaliyo markii ay haboon tahay xuquuq dhaqameedka isticmaalka kheyraadka dabiiciga ah si waafaqsan dastuurka Puntland isla markaana xaqsoor ku dhisan ayna doorbidayaan bulshadu;
d) In qof kasta oo guri dhisanaya lagu soo rogo , in uu ballan qaaado in uu ugu yaraan hal geed gurigiisa ku beerayo ;

e) In dib loo qaabeeyo tuulooyinka iyo deegaamada firiqsan iyadoo la isugu soo ururinayo deegaamo urursan oo leh kaabayaashii dhaqaale iyo adeegyadii bulsho.

### 4.14 Jinsiga iyo Deegaanka

Jinsigu (rag iyo dumar ba) waxa uu ka ciyaaraa kaalin muhiim ah maaraynta Deegaanka. Qaybaha kala duwan ee bulshada ayaa waxaa saameeya dhibaatooyinka Deegaanka ka jira. Dumarku waxay ka ciyaaraan kaalin muhiim ah maaraynta

Deegaanka iyadoo la garwaaqsanayo awoodooda, khibradooda iyo aqoontooda la xiriirta Deegaanka.

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo xaqiijiyo ka qaybgalka buuxa ee muwaadin kasta oo reer Puntland , rag iyo dumar ba , kaga aadan ilaalinta iyo dhawrista deegaanka , dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In lagu daro arrimaha khuseeya jinsiga dhamaan siyaasadaha loo samaynayo deegaanka ;
b) In lagu daro lafa-gurka kaalimaha jinsiga (rag iyo dumar ba) barnaamijyada lagu ilaalinayo , laguna dhawrayo khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka ;
c) In kor loo qaado ka qaybgalka raga iyo dumar ku ku yeelanayaan waxbarashada, tababarada , ololayaasha wacyigelinta dadwaynaha iyo go'aamada ku saabsan maaraynta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah .

## 4.15 Cilmi Baarista iyo Xogta Deegaanka

Xogtu waa mid asaas u ah higsiga gaarista horumar waara, waana mid lagama maarmaan u ah dejinta qorshayaal iyo gaarista go'aamo dhaxal gal ah. Tusaale ahaan, dayax gacmeedka, xogta nidaamka dhulka iyo sawirada dhulka dusha laga sawiraa waa fursado hor leh oo looga faa'iidaysto isku dubaridka iyo lafa gurka xogta iyo khariidad (maab) soo saarista. Laakiinse, xog la'aanta iyo habka xogta loo aruuriyo oo aan ku filnayn waxa ay ragaadisay in si cilmiyaysan loo qorsheeyo barnaamijyada wax looga qabanayo deegaanka deegaamada Puntland.

**Tallaabooyinka Istiraatiijiga**

Si kor loogu qaado cilmibarista iyo helidda xogta maaraynta deegaanka , dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda :

a) In la abuuro hab cilmi-baariseed iyo maarayn xog oo heer qaran ah oo ku aadan maaraynta kheyraadka dabiiciga ah
b) In kor loo qaado ku dhafidda aqoonta dhaqan ee soo jireenka ah tallabooyinka lagu qorsheynayo laguna maareynayo deegaanka;
c) In dhidibada loo taago sanduuq lagu maalgeliyo barnaamijyada cilmibaarista iyo helidda qalb iyo farsamo casri ah oo loogu kuur-galo xaaladaha deegaanka si loo xaqiijiyo maaraynta deegaanka .

## 4.16 Sahminta Saamaynta Deegaanka

Maadaama hawlaha horumarinta iyo isticmaalka dhulkuba ay saamayn ku reebayaan deegaanka, waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo qiimayn iyo daraasaad loo

gu kuurgalayo arrintaas. Sababta loo gu baahanyahay samaynta daraasadda Qiimaynta iyo u Kuurgalidda Saamaynta Deegaanka waa iyada oo arrintaasi dhaqaale ahaan ay tahay tallaabada ugu habboon, iyada oo ka hortagista dhaawaca soo gaara deegaanku ay ka kharash iyo dhib yartahay wax ka qabashadiisa dhibta ka dib .

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo qaabeeyo , loona hirgeliyo Barnaamijka Dabagalka Deegaanka, Dawladda Puntland waa in qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In la dejiyo sharci haga habka ugu habboon ee loo samaynayo daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka, Warbixinta Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Warbixinta Dabagalka Deegaanka oo lagu samaynayo dhamaan mashaariicda horumarineed haddii ay yihiin kuwa dadka ka dhexeeya iyo kuwa gaarka loo leeyahay ba ;

b) In waax qaabilsan la socodka fulinta iyo samaynta Sahminta Saamaynta Deegaanka laga yagleelo Wasaaradda Deegaanka , Dalxiiska iyo Duurjoogta , iyada oo fulinta mashaariicda la gu sameeyay Sahminta Saamaynta Deeganka loo dhaafayo wasaaradaha iyo wakaaladaha ay khusayso ;

c) In la horumariyo awoodda wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladdu u leeyihiin samaynta daraasadda Sahaminta Saamaynta Degaanka ;

d) In la xaqiijiyo in warshadaha iyo maashaariicda dalka laga yagleelayo ay haystaan waraaqda caddaynta daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka ka hor inta aanay wax hawl ah bilaabin;

e) In la xaqiijiyo in mar walba lagu dhafo daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka qorshayaal lagu yaraynaayo dhibaatooyinka ku imaan kara maareynta deegaanka iyo sidoo kale qarshayaal kutalagal ah kuwaas oo la gula tacaalo haddiiba ay dhacaan shilal;

f) In la sameeyo dabagal deegaan oo ku jirto kor-joogtayn iyo kaydin qoraaleed si lo hubiyo u hoggaansan buuxa oo ku aadan Sahminta Saamaynta Degaanka .

## 4.17 Waxbarashada iyo Wacyigelinta Deegaanka

Wax-barashada deegaanku, mid toos ah iyo mid dad ban ba, waxa ay asaasi u tahay bedelidda qaab-fikirka bulshada ee arimaha deegaanka, kor u qaadida wacyi gelinta, kobcinta baahinta adeegyada, dareensiinta dadka arimaha xasaasiga ah ee deegaanka iyo kobcinta awoodaha hay'adaha ku howlan arimaha deegaanka.Xiriirka iyo xog wadaaga arrimaha degaanka ee u dhexeeya dhamaan bah-wadaagta waa caqabad wali jirta.

**Tallaabooyinka Istiraatiiji**

Si loo qaabeeyo, loona fuliyo barnaamijyo dhamaystiran oo waxbarashada deegaanka ah iyo wacyigelin dadwayne oo ku aadan ilaalinta deegaanka, dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In wacyigelin ballaaran loo sameeyo dadweynaha si loo dareensiiyo mas'uuliyada ka saaran ilaalinta deegaanka;

b) In lagu daro manhajka waxbarashada cilmiga barashada deegaanka kaas oo ay ka faa'ideysan karaan da' kasta;

c) In la isu duwo, lana qabto siminaaro lagu baranayo deegaanka oo ay kasoo qayb galaan dhaqaale yahanada, qorshe dejiyaasha, gar-yaqaanada, enjineerada, xeel dheerayaasha cilmiga bulshada , dhaqaatiirta iyo sidoo kale culumada cilmiga deegaanka iyo khayraadka;

d) In la abaabulo siminaaro ku saabsan barashada deegaan, khabiirada ku xeel-dheer arrimaha dhaqaalaha, qareenada, injineerada, khuburada arimaha bulshada caafimaadka iyo waliba khubarada deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah;

e) In la bixiyo tababaro takhasus oo ku saabsan dhaqaalaha deegaanka, shuruucda deegaanka, qiimaynta deegaanka, nidaamka xogaha barashada dhulka, qiimaynta iyo xakamaynta wasakhowga iyo maaraynta wasakhda halista ah;

f) In la taageero ka qaybgelinta culimada, saxaafadda, qalinlayda, gabayaaga, fannaaniinta iyo odayaasha barnaamijyo kor loogu qaadayo aqoonta iyo wacyiga dadku ka haystaan deegaanka.

## IV. FULINTA SIYAASADDA

Dawladda Puntland, iyada oo ka duullaysa xuquuqaha deegaan ee muwaadin kasta ay siinayaan diinta islaamka, dastuurka iyo heshiisyada caalamiga ah, waxa ay masuul ka tahay sidii ay u xaqiijin lahayd xaqa muwaadin walbaa u leeyahay in uu ka faaiidaysto khayraadka deegaanka si loo wada siman yahay. Haddaba, Waxaa looga fadhiyaa Dawladda in ay la timaado dhammaan tallaabooyinka muhiimka u ah fulinta siyaasaddan ha ahaato mid xeer-dejineed, hay'adeed, qoondayn miisaaniyadeed iyo qorshayn ba. Dhammaan Hay'adaha Dawliga ah, Hay'adaha Horumarinta, bulshada rayidka ah iyo bulshaweynta waa in ay door ka ciyaaraan hireglinta siyaasaddan. Sidaa darteed, waxaa lama huraan ah wadar mas'uuliyadeed iyo iskaashiga hay'adaha kala duwan si loogu guulaysto fulinta, kormeerka iyo qiimaynta siyaasaddan.

### 5.1 Muddada

Mudada hirgelinta siyaasaddan waa 10 sano oo ka bilaabanaysa marka uu Baarlamaanku ansixiyo, Madaxweynuhuna saxiixo.

### 5.2 Qorshaha Istaraatiijiga

Siyaasaddani uma baahna oo keliya qaab midaysan oo bahwadaagta deegaanku yeelato taasoo qeexaysa mas'uuliyadaha, hannaan maamuleedka, mideynta siyaasadaha haya'daha dawladda, xeerarka iyo maaliyadda, balse waxaa kaloo u baahantahay dejinta Qorshe Istaraatiiji ah oo leh muddo iyo yoolal la higasado oo lagu heshiiyay.

### 5.3 Iskaashiga Heer Gobol iyo Heer Caalami

Dhibaatooyinka ka jira deegaanku waa kuwa isku mid ah oo aad u murugsan, una baahaan in dunida oo dhan iska kaashato. Wax kaqabashada deegaankuna waa mid hal dal ama qaarad aanay ku filnayn, waase arrin ay wax ka qabashadeeda dunida oo dhan looga fadhiyo. Haddaba, Puntland/Somaliya waxa ay awooddooda ku biirinayaan dadaalada ay wadaan wadamada dariska ah iyo kuwa durugsan ba, si loo xakameeyo wasakhda iyo sumaha xuduudaha isaga gudubta, iyo in si wanaagsan loo maareeyo khayraadka biyaha, seerayaasha, iyo arrimaha kale ee deegaan kuwaas oo u baahan in heer gobol iyo heer caalami ba la isaga kaashado, gaar ahaan arrimaha la xiriira doorsoonka cimilada iy xaalufka dhirta.

Sidaas awgeed, Puntland iyada oo qayb ka ah Somaliya waxa xil ka saaranyahay xushmaynta iyo hirgelinta axdiyada, borotookalada (hab-maamuusyada) iyo heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta deegaanka kuwaas oo Dawladda Soomaaliya saxiixday , ansixisayna . Hase ahaatee, wali waxaa jira axdiyo iyo heshiisyo dhawra oo deeganka la xiriira kuwaas oo aan Soomaliya wali ansixin.

Haddaba, siyaasaddan deegaanku waxa ay fursad wayn u tahay fulinta xeerarka caalamiga ah kuwaas oo Somaliya ay qaybta ka tahay iyo kuwa mustaqbalka ay Somaliya qaybta ka noqon doonto.
Si haddaba ay Puntland siyaasaddaan u fuliso waxay ay u baahan doontaa taageero dhinacya badan leh oo ay ka hesho hay'adaha caalamiga iyo kuwa gobolka sida hay'adaha Qaramada Midoobay iyo kuwa kale ee horumarinta ka shaqeeya.
Dhankeeda, Dawladda Puntland waxa ay ku dari doontaa maarayrita deegaanka dhamaan qorshayaasheeda horumarineed iyo heshiisyada wax wada qabsi ee ay la galayso dawlad kale ama dawlado badan , waxayna qaadi doontaa tallaabo kasta oo laga maar-maan u ah isku dubaridka iyo xaqiijinta in si tayo leh loo maareeyo tageerada ay bixiyaan hay'adaha iskaashiga ay la leedahay. Sidoo kale, maaraynta deegaanku waxa ay qayb libaax ka heli doontaa miisaaniyadda dawladda ee loo qoondeeyo horumarinta.

## 5.4 Diyaarinta Sharciyada

Qawaaniinta fara ku tiriska ah ee hadda lagu xeeriyo deegaanku waa kuwa la dejiyay xilliyadii wadanka ay ka talinaysay Dawladdii Dhexe ee Soomaliya, waana ku wa aan laga shaqaysiin wixii ka dambeeyay sanadii 1991. Haddaba, shuruucdaan waa kuwa kala`yaacsan, waqtiga aan la socon, awoodana isugu keenaysa gacanta dawladda dhexe. Sidaas awgeed, shuruucda hadda jiraa waa kuwa aan shaqayn oo aan si ku filan wax uga qaban karin arrimaha deegaan ee dalka ka jira. Taya xumadaasina waxa ay saamayn xun oo wayn ku yeelan maaraynta khayraadka dabiiciga iyo deegaanka.

### Tallaabooyinka Istiraatiiji

Si loo dhiirigeliyo, loona ilaaliyo xaqa dastuuriga ah ee muwaadin kasta u leeyahay in uu ku noolaado deegaan fiyaw oo nadiif ah, Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

a) In la ansixiyo, lana fuliyo sharci midaysan oo ka qaybqaata hirgelinta siyaasadda deegaanka;
b) In diyaarin, dib u eegis iyo boor ka jafid ba (casriyayn) lagu sameeyo shuruucda u degsan wakaaladaha iyo hay'adaha kala duwan ee dawladda iyo xeer hoosaadyada degmooyinka ee khuseeya maaraynta deegaanka iyadoo ay soo hoos galayaan sharci usamaynta maaraynta qashinka, daaqa, ugaarta, gubista dhuxusha, hal beegyada maaraynta deegaanka, habka loo samaynayo daraasadda Sahaminta Saamaynta Deegaanka iyo in qof kasta oo dhibaato u gaysta deegaanka uu isagu dhabarka u rito masuuliyadda wixii ka yimaada;

c) Iyadoo la tashaynaysa Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, Puntland waxay sii wadi doontaa in ay ka qaybqaadato horumarinta shaciga caalamiga ee la xiriira deegaanka , waxayna door firfircoon ka geli doontaa sidii ay uga hirgelin lahayd shuruucdaas iyo habraacyadaas caalamiga geyigeeda.

## 5.5 Isku-dubaridka Hay'adaha

Qaar ka mid ah hay'adaha dawliga ah, kuwa horumarinta iyo bulshada rayidka ah ayaa ku hawlan dhawrista iyo maaraynta deeganka, taasoo ay sababtay baahida loo qabo ka falcelin noocya badan leh. Isku xirnaan la taaban karo oo dhexmarta hay'adahaas iyo iswaafajinta barnaamiyadooda deegaan waa lama huraan.

Siyaasaddan waxaa la hirgelin doona iyadoo la waafajinayo Siyaasada Puntland ee Daaqa, Biyaha, Maamul Baahinta, Xoolaha, Caafimaadka, iyo Nadaafada. Sidaa darteed, marka la dhaqangeliyo siyaasaddan dhinacyada badan, waxaa daruuri noqon doonta in dhammaan Wasaaradaha iyo Wakaaladaha Dawladdu ay dib-u-eegis ku sameeyaan awoodohooda sharciyeed, qawaaniinta maamul iyo siyaasadaha iyo hab-raacyada jira si loo ogaado in ay jiraan wax ka dhiman iyo iswafaqsanaan la'aan xanibaysa in si buuxda loogu hogaansamo ujeedada iyo qodobada siyaasaddan. Tallaabadani waxay xaqiijin doontaa in siyaasadahoodu iyo qawaaniintoodu waafaqaan ujeedooyinka iyo habraacyada ku jira Siyaasada Deegaanka Puntland.

### 5.5.1 Kaalinta Maamulka Dhexe

Wasaaradda Deegaanka, Duurjooga iyo Dalxiiska waxay samayn doontaa **Xoghaynta Siyaasadda Deegaanka Puntland** oo u xilsaaran in ay dusha kala socoto fulinta siyaasadda.

Xilka balaaran ee Xoghanynta (Guddiga) Siyaasaddan oo dhex-degi doona Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska waxaa ka mid ah:

a) Dejinta qorshaha fulinta siyaasaddan oo dhamaystiran lehna yoolal xilliyaysan, halbeegyo iyo khayraad hantiyeed iyagoo la kaashanaya bahwadaagta kale.

b) Samaynta galaangal ku aaddan in Dawladda Puntland u qoondayso miisaaniyad ku filan deegaanka. Xoojinta iskaashiga deeq bixiyayaasha iyo dawladaha gobolka si loo abaabulo kharashaad lagu so afjaro dhibaatooyinka deegaan ee Puntland.

c) La xiriiridda gudiyada la walaalka ah ee Golaha Wasiirada, Baarlamaanka, iyo Wasaardaha kale.

d) Taageerida dib-u-eegista iyo iswaafajinta siyaasadaha, shuruucda, barnaamiyada iyo mashaariica deegaanka la xiriira.

e) Xoojinta awood dhisidda hay'adaha dawliga ah iyo dadweynaha ku hawlan ilaalinta iyo maaraynta deegaanka ee heerarka kala duwan sida Dawladda, Bulshoweynta, Hay'adaha Bulshada Rayidka ah iyo ganacsatada.

f) Kor u qaadista maamul baahinta la xiriirta maaraynta deegaanka iyo ka qaybgalka dawladaha hoose iyo bulshoweynta ee ilaalinta iyo dhawrista deegaanka.

g) Sare u qaadista ku darista maaraynta khayraadka dabiiciga ah ilaalinta xuquuqda aadanaha.

Haddaba kaalimaha looga doonayo bahwadaagta dawladda ee kala duwan in ay ka ciyaaraan hirgelinta siyaasaddaan waa sida hoos ku xusan :

**Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska**

a) In ay samayso lafagur iyo cilmibaaris ku aaddan dhinacyada deegaanka iyo doorsoonka cimilada kuwaas oo xiriir la leh horumarka qaran ee la higsanayo , dhimista faqriga , maaraynta masiibooyinka iyo gaarista Yoolalka Horumarinta Kun Xilliyeedka ;

b) Dejinta iyo waafajinta siyaasadaha deegaanka, shuruucda iyo qoryashaaya waa wayn ee wasaaradda siyaasadaha kale ee wasaaradaha iyo wakaaladaha si loo xaqiijiyo gaarista horumar waara

c) In ay qaabayso oo samayso daraasad ku aaddan Sahamminta Raadka iyo Khatarta (sida Sunta, saliidda badda ku qubata iyo qashinka iyo sumaha dalka lagu aaso) ay deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ku hayaan ;

d) In ay qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo raacidda iyo u hoggaansanka heshiisyada caalamiga ee deeganka la xiriira kuwaas oo Somaliya qaybta ka tahay ;

e) In ay horumariso oo qaabayso hab ballaaran oo lagu kormeero deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah kaas oo raacaya shuruudaha looga baahanyahay kormeerka iyo warbixinada iyo qaadidda tallaabooyin lagu dhayayo ama lagu shafshafaynayo qof ama Deegaan kasta oo waxyeello soo gaarto ;

f) In ay samayso wacyigelin iyo waxbarasho dadwayne oo heer walba leh kuwaas oo dadka lagu barayo arrimaha la xiriira maaraynta iyo ilaalinta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah;

g) In ay kobciso oo xoojiso awoodda hay'adaha fulinaya barnaamijyada iyo siyaasadda deegaanka iyo sidoo kale bud-dhigayaasha kale ee hawshaas ku hawlan ;

h) In ay dejiso shuruuc iyo hal -beegyo haga daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka taas oo ay tahay in lagu sameeyo dhammaan mashaariicda ka hor intaan la fulin mashaariicda la fulinayo.

## Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka

a) Hubinta in aan beero laga samayn bartamaha dhul-daaqsimeedyada;
b) Ka hortegidda soo dejinta walxaha kiimikada beeraha ee waxyeela deegaanka ka dhalan karto;
c) Ku tababaridda beeralayda dhawrista iyo ilaalinta deegaanka goobaha biyo degga ah iyo dooxooyinka ;
d) Hubinta in si haboon loo isticmaalo loona asturo sunta cayayaanka iyo bacrimiyaha.

## Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraada Badda

a) Ku darista ilaalinta deegaanka badda ruqsad bixinta iyo heshiisyada lala gelayo shirkadaha kaluumaysiga;
b) Kala shaqaynta Wasaaradda Deegaanka ilaalinta jebellada kaluunku dego kuna tarmo.
c) Kala shaqaynta Wasaaradda Deegaanka ilaalinta iyo dib u soo nooleynta dhirta khooriyada (mangrooves);
d) Samaynta hab loo maamulo qashinka iyo wasakhda xeebaha;
e) Ku tababaridda iskaashatooyinka kaluumaysiga dhawrista iyo ilaalinta deegaanka badda.

## Wasaaradda Xanaanada Xoolaha

a) Ka qaybqaadashada ilaalinta iyo dhawrista dhul-daaqsimeedka iyo kaymaha si kor loogu qaado wax soo saarka xoolaha;
b) Ku darista habka loo maamulo daaqa (grazing management systems) tababarada la siiyo xoolo dhaqatada
c) Ku wacyigelinta bulshada ee ku aaddan ka faa'iidaysiga iyo wadaagga khayraadka dabiiciga ah si nabdoon.

## Wasaaradda Arimaha Gudaha, Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga

a) Xoojinta hanaanka awood baahinta si loo gu suurta-geliyo golayaasha degmooyinka ilaalinta deegaanada ay xilka ka hayaan hab waafaqsan Xeerka dib loo eegay ee " Golayaasha Degmooyinka Dawladda Puntland" tirsigiisuna ahaa 7 , soona baxay 18 September 2003;
b) Iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Deegaanka, in dib-u-eegis lagu sameeyo barnaamijyada iyo habdhaqanka maaraynta qashinka;

c) Horumarinta habdhaqan deegaanka u wanaagsan oo loo maareeyo wasakhda iyo qashinka;
d) Ka taageerida Wasaaradda Deegaanka hirgelinta maamul baahinta ku aaddan adeegyada khayraadka dabiiciga iyo hoos u daadejinta awooda;
e) Ruqsad siinta shirkado qashin qaada oo buuxiya shuruudaha ku haboon nadaafadda deegaanka iyo caafimaadka bulshada;
f) Xakamaynta deegaameynta aan loo meel dayin ee lagu sameenayo dhul daaqsimeedyada.

## Wasaaradda Qorshaynta & Xiriirka Caalamiga

a) Xaqiijinta in arrimaha iyo ahmiyadaha deegaanka lagu daro qorshayaasha qaran iyo miisaaniyad samaynta;
b) Hubinta in Dawladda Puntland u hogaansanto heshiisyada iyo habraacyada caalamiga ah ee Soomaaliya qaybta ka tahay;
c) Ka taageerida Wasaaradda Deegaanka xiriirka caalamiga ah iyo hawlaha dhaqaale ururinta (fundraising).

## Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka

a) Ka gacansiinta Wasaaradda Deegaanka arrimaha hirgelinta iyo fulinta daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka (EIA) ;
b) Dejinta siyaasad hagta lahaanshaha dhulka iyo ka taageerida Wasaaradda Deegaanka isticmaalka iyo khariidadaynta dhulka;
c) La samaynta iskaashi Wasaaradaa Deegaanka ku aaddan dayactirka iyo dib u soo nolaynta dhul-daaqsimeeyada waxyeeladu kasoo gaartay dhismayaasha wadooyinka.

## Hay'adda Biyaha, Tamarta iyo Khayraadka Dabiiciga ah ee Puntland

a) Kala shaqaynta Wasaaradda Deegaanka horumarinta farsamooyin casri ah oo tamar bedel u noqon karta dhuxuusha iyo xaabada;
b) Ka taageerida Wasaaradda Deegaanka samaynta habab deegaanka u wanaagsan oo loo kaydiyo biyaha dhulka iyo maaraynta biyo rogyada;
c) In la isticmaalo habraacyada daraasadda Qiimaynta Saamaynta Deegaan si looga hortago ka qodista ceelasha dhul-daaqsimeedka iyo sabo-degaanada nugul ama buuhoodka ah .

**Hay'adda Arrimaha Bini'aadanimda & Maaraynta Masiibooyinka**

a) Kala shaqaynta Wasaaradda Deegaanka dejinta istratiijiyadda isbedelka cimilada, ka sii digista masiibooyinka iyo u adkaysiga abaaraha **(drought resilience)**;
b) Ka tageeridda Wasaarada Deegaanka khariidadaynta bulshooyinka iyo goobaha u nugul masiibooyinka iyo abaaraha.

**Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha**

a) in ay ku xirto cid kasta oo mashruuc warshadeed dalka ka yagleelaysa in uu haysto shahaadada daraasada Sahaminta Saamaynta Deegaanka;
b) in ay xakamayso oo hubiso tayada badeecadaha wadanka lasoo gelinayo ;
c) In ay xakamayso oo sugto faya-dhawrka iyo nadaafadda suuqyada, goobaha ganacsiga iyo xaruumaha warshadaha .

**Wasaaradda Cadaaladda , Arrimaha Diinta iyo Dhaqan-celinta**

a) Dib u eegista iyo iswaafajinta shuruucda deegaanka iyo wareegtooyinka ;
b) Ka shaqaynta sidii aragti midayasan looga dhex samayn lahaa culimada diinta iyo sharciyaqaanada dhanka ka faa'iidaysiga iyo ilaalinta deegaanka iyadoo la raacayo Mabaadii'da Shareecada Islaamka;
c) Faafinta iyo xaqiijinta fulinta shuruucda deegaanka ee la ansixiyo.

**Wasaaradda horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska**

a) In ay xaqiijiso ku dhafidda arrimaha dumarka maaraynta deegaanka ;
b) In ay fududayso in dumarku awood u helaan ay uga faaiidaystaan khayraadka dabiiciga ah, awoodna loo siiyo in ay khayraadkaas maamushaan.

**Wasaaradda Waxbarashada**

a) Wasaaradda Wabxbarashada waxay u hawlgeli doontaa ku daridda manhajka waxbarashada maaddo la yiraahdo cilmiga barashada deegaanka si loogu abuuro maskaxda da'yarta qiimaha uu leeyahay deegaanku;
b) Dejinta barnaamijyo barbar socdo manhajka waxbarashada dugsiyada sida sida ka qaybqaadashada dhireenta dugsiyada, xaafadaha iyo qashin uruurinta si ardada looga dhigo kuwo qadariya faa'iidooyinka uu deegaanku u leeyahay jiilka maanta iyo kan berry;

c) Gacan ka geysashada yegleelida macaahid iyo kulliyado si gaar ah u soo saara xeel dheerayaal cilmiga deegaanka ah.

**Wasaaradda Dhallinyarda iyo Ciyaaraha**

a) In ay ku darto arrimaha dhalinyarada maamulka iyo maaraynta deegaanka;
b) In ay ku wacyigeliso dhalinyarada inta ay caruurta yihiin muhiimadda ilaalinta deegaanka ;
c) In ay ku tababarto, kuna hagto dhalinyarada xirfado farsamo oo suuqa shaqada looga baahanyahay si loo yareeyo culayska dhalinyaradu ku hayaan khayraadka dabiiciga iyo deegaanka.

**Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta , Dhaqanka iyo Hiddaha**

a) Iskaashi la samaynta saxaafada si loo diyaariyo filimaan iyo qormooyin ku saabsan arrimaha deegaanka oo laga baahiyo TV-yada, idaacadaha iyo saxaafada qoraalka ah;
b) Xaqiijinta in saxaafadu ay baahiso warar sax ah, isla-markaana ay noqdaan marin warbixineed `oo ka tayaysan xaga warbaahinta iyo ogeysiinta faa'iidooyinka deegaanka.

**Wasaaradda Amniga , Hubka Dhigista iyo Dhaqan-celinta**

a) Qabanqaabada tababarro u gaara dembi baarayaasha booliska iyo dacwad oogayaasha oo la xiriira qawaaniinta iyo siyaasadaha deegaanka;
b) Samaynta Boolis u gaar ah (environmental police) ilaalinta iyo hirgelinta shuruucda deegaanka.

**Wasaaradda Caafimaadka**

a) Xaqiijinta in shaqaalaha caafimaadku dhowraan nadaafadda deegaanka ee xarumaha caafimaadka eek u yaala herarka kala duwan ee gobol, degmo ama tuulo;
b) Iskaashi la samaynta Wasaaradda Deegaanka si loo dejiyo habraacyo tusmaynaya aasida haraaga dawooyinka oo aan dhibbi ka imaan ;
c) Ku laridda aqoonta iyo xogta nadaafadda deegaanka siyaasadaha iyo qorsheyaasha caafimaadka iyo manaahiijta dugsigyada tababarrada caafimaadka.

## 5.6 Kaalinta Gobolada iyo Degmooyinka

Dawladda Puntland waxa ay doorbatay siyaasadda baahinta maamulka iyo maamul wanaagga in ay tahay hab sare loogu qaado kaqaybgalka, daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka.

Siyaasadda baahinta maamulka ee dhawaan Dawladdu ansixisay waa mid looga golleeyahay dhiirigelinta habka ismaamulka degmooyinka haddii ay ahaan lahayd hawlaha qorshaynta, fulinta, kormeerka iyo qiimaynta .

(a) **Kaalinta Heer Gobol:** guddoomiyaasha gobalada iyo ku xigoonadooduba , iyaga oo matalaya dawladda, waxa ay masuul ka noqon doonaan :

- Fulinta siyaasadaha iyo shuruucda deegaanka ;
- Kormeerka, qiimaynta iyo siinta talo iyo taageero ba maamulada degmooyinka iyo tuulooyinka iyo la shaqaynta odayaasha dhaqanka, ururada xoola dhaqatada iyo guddiyada tuulooyinka si deegaamadooda u noqdaan kuwa dhawrsoon (deegaan ahaan).

(b) **Kaalinta Heer Degmo:** Golaha Degmooyinka ama deegaanku waxa ay masuul ka noqon doonaan :

- Ansixinta xeer hoosaadyada deegaanka si loo ilaaliyo , loona maareeyo deegaanka hab waafaqsan Siyaasadda Deegaanka Puntland iyo xeerarka kale ee deegaanka la xiriira;
- Maamulka iyo maaraynta isticmaalka dhulka , qorsha usamaynta magaalooyinka, nadiifinta wadooyinka, siinta biyaha, maaraynta qashinka , gacan ku haynta dhiraynta magaalooyinka iyo beeraha lagu nasto ee dawladda iyo sidoo kale ilaalinta iyo maaraynta deegaanka ;
- Dejinta qorshayaal lagu ilaalinayo deeganka kuwaas oo fulintooda ay la kaashanayaan maamulka dhexe ;
- La shaqaynta odayaasha dhaqanka, ururada xoolo dhaqatada, iyo guddiyada tuulooyinka si loo xaqiijiyo deegaan ilaashan oo deegaamadaasi yeeshaan.

## 5.7 Kaalinta Ururada Bulshada Rayidka iyo Shirkadaha Ganacsiga gaarka ah

Ururada bulshada rayidka iyo shirkadaha gaarka loo leyahay ba waxa ay kaalin muhiim ah kaga jiraan abaabulidda iyo ku wacyigelinta bulshada arrimaha deegaanka. Sidaas awgeed, waxa ay dhamaystirayaan dadaalada dawladdu wado, waxayna gacan-ka-gaysanayaan sidii loo xaqiijin lahaa in dhibaatooyinka bulshada ka haysta deegaanku noqdaan kuwa lagu daro hanaanka horumarineed ee qaran. Haddaba, dawladddu waxay ka faa'iidaysan doontaa dhex- joogidooda joogtada ah ee bulshaweynta si ay dawladda dedaaladeeda ku aaddan dhawrista iyo ilaalinta khayraadka dabiiciga ah uga taageeraan iyagoo adeegsanaya waxbarasho, wacyigelin iyo maal-gelin ba . Gaar ahaan, Ururuada Bulshada Rayidka iyo

shirkadaha ganacsiga gaarga ah waxay ka qaybqaaddan doonaan – in kastoo aaney intaan ku koobnayn – hawlahan soo socda:

a) Galaangal u samaynta arrimaha deegaanka iyo ka qaybqaadashada abaabulka agabka iyo hantida loogu baahanyahay ilaalinta deegaanka;
b) Tababaridda iyo awood kobcinta bulshada;
c) Isku xirka dawladda iyo bulshada ;
d) Ka ciyaaridda kaalin fir-fircoon ilaalinta deegaanka iyagoo xaqiijinaya in qaybaha deegaanka lagu dhafo dhammaan hawlaha la fulinayo , gaar ahaan hawlaha ganacsiga , warshadaha iyo kuwa farsamo intaba;
e) Samaynta dallado iyo kooxo ku hawlan in gebi ahaan isticmaalka dhuxusha laga waantoobo;
f) In ay ka qaataan door hoggaamineed oo muhiim ah fulinta siyaasadda deegaanka iyadoo looga golleeyahay gaariddda qaybaha kala duwan ee bulshada miyi iyo magaalo ba.

**5.8 Kaalinta Hay'adaha Horumarinta**

Kaalinta Hay'adaha Horumarinta – kuwa dalka iyo kuwa caalamiga ba - ay ku yeelanayaan fulinta siyaasaddan iyo qorsheyaasha la xiriira waa lagama maarmaan. Taageeradaay ka gaysanayaan ka hirgelinta Siyaasaddan waxaa ka mid noqon doonta - in kastoo aaney intaan ku koobnayn – kuwa soo socda:

a) Maalgelinta iyo taageerada farsamo ee barnaamijyada iyo mashaariicda deegaan ee xilliga fog.
b) Awood kobcinta dhamaan bahwadaagta deegaanka.
c) Kafaalo qaadida cilmi baaris habaysan oo baahsan ee dhanka deegaanka iyo wixii la xiriira.

## 5.9 Hababka Maalgelinta

Fulinta siyaasadda deegaanku waxa ay u baahantahay iskaashi xooggan oo dhexmara Dawladda Puntland, Dawladda Federaalka Somaaliyeed, dadka deegaanka, bulshada rayidka iyo hay'adaha caalamiga ah ee Puntland wadashaqaynta la leh. Sidaas awgeed, waxaa la quud-darraynayaa in dhaqaalaha loogu baahanyahay waxkaqaqabashada deegaanka uu ka imaan doono: Dawladda Puntland, Dawladda Federaalka Somaaliyeed, dadka deegaanka, ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo dhaqaale ka yimaada ilo bannaanka ah sida deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha. Haddaba, si loo xaqiijiyo maalgelin ku filan oo looo helo ilaalinta deegaanka , Dawladda Puntland waa in ay qaadaa tallaabooyinka soo socda:

- In ay uga qoondayso miisaaniyad sanadeedka Dawladda maaliyad ku filan ilaalinta iyo maaraynta deegaanka ;
- In ay ku dhiirigeliso shakhsiyaadka , ururada bulshada iyo ganacsiga gaarga loo leeyah kaqaybqaadashada ilaalinta deegaanka haddii ay ahaan laahyd in ay kharash ama waqti iyo fikrad ay u huraan ;
- Ballaarinta ilaha dakhliga kasoo galayo Wasaaradda Deegaanka, Duurjoogta iyo Dalxiiska si loo xaqiijiyo helidda maaliyad ama khrash waara oo loo helo hay'adaha ku hawlan maaraynta deegaanka.

## 5.10 Awood Kobcinta

Tababar haboon iyo awood kobicntu waxay muhiim u yihiin fulinta siyaasadda iyo hirgelinta shuruucda. Tababaradu waa in ay wada gaaraan dhamaan heerarka kala duwan, isla markaana la siiyo dadka la tababaryo faham qotadheer oo ku saabsan khayraadka dabiiciga ah maadaama ay horumarka waara iyo xirfad siinu tari karaan in ay so afjaraan dhibaatooyinka deegaan taasoo laga wada qayb-elayo. Kooxahaani waa in lagu tababaraa ololeyaal wacyigelineed iyo casharo cayiman si loogu tababaro meelaha ay ku xeeldheer yihiin. Dedaalada tababarada iyo awood kobcintu waxay wax ku ool noqon kartaa marka la dejiyo oo la naqshadeeyo iyadoo lala kaashanayo machadyo ku xeeldheer.

## 5.11 Qiimaynta iyo Dib-u-Eegista Siyaasadda

Kormeerka iyo qiimaynta siyaasaddani waxay diiradda saari doontaa xiriirka ka dhexeeya waxqabadyada iyo ujeeddooyinka siyaasadda ee la higsanayo gaaridooda; iyadoo haddana aanay meesha ka maqnayn in tixgelin la siiyo hadba isbedelada ku imaanaya deegaanka iyo la jaanqaadkooda. Haddaba, si loo xaqiijiyo in qodobadii siyaasaddan si wanaagsan loo gaaray, waa in la sameeyaa kormeer iyo qiimayn joogto ah oo ku aaddan guud ahaan barnaamijyada iyo hawlaha khayraadka dabiiciga ah. Waxaa laga maarmaan ah in la qiimeeyo, lana kormeero horumarka iyo wax-ku-oolnimada tubaha ama qorshayaasha horay u degsanaa inta lagu guda jiro fulinta barnaamijyada deegaanka.

Sidaas awgeed, waa in la dejiyaa hab dhamaystiran oo siyaasadda ku samaynaya kormeeriyo qiimayn leh halbeegyo cadcad oo wadatashi lagu abyey.Habkani wuxuu u baahan yahay xiriirin ku filan iyo iskaashi ka dhexeeya hay'adaha dawliga ah, bulshada, deeq-bixiyeyaasha iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ee ka qaybqaata hawlaha deegaanka.

Soo saarista iyo daabicista warbixino xilliyeed ka hadlaya xaaladda hadba uu marayo deegaanku heer dawladeed iyo heer degmo ba waxa uu fududayndoonaa qiimaynta horumarka laga sameeyay ilaalinta iyo maaraynta deegaanka iyo qaadashada hadba tallaabooyinka ku habboon.

Waxaa afartii sanaba mar la samayn doonaa qiimayn guud oo ku aaddan wixii ka qabsoomay siyaasaddan si loo cabbiro heerarka fulineed iyo saamayneed, lana diiwaangeliyo goldoloolooyinka, kuwaasoo sal u noqon doona dib-u-eegista xilliga dhexe iyo kan kama dambaysta ah ee siyaasaddan si kor loogu qaado nuxurkeeda iyo habboonaanshaheeda. Waxaa dib-u-eegis buuxda lagu samayn doonaa siyaasaddan 5tii sano mar iyo hadba sida baahidu keento si loola jaan qaado isbedellada dhaqan-dhaqaale, farsamo iyo siyaasadeed ee lasoo gudboonada deegaanka Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**